Ilaahay wuu caroodaa, Muuminkuna wuu caroodaa, carada Ilaahay waa inuu Muuminku la yimaado wax Ilaahay ka xarimay

Abii Hureyra-Allaha ka raali ahaadee- waxaa laga wariyey inuu yiri: Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu yiri: "Ilaahay wuu caroodaa, Muuminkuna wuu caroodaa, carada Ilaahay waa inuu Muuminku la yimaado wax Ilaahay ka xarimay".
[Xadiis Saxiix ah] [Xadiis la isku waafaqay]

Nabigu wuxuu sheegay-nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee- wuxuu sheegay in Ilaahay Qiiroodo caroodna karaahsadona, sida Muuminku u Qiiroodo una Caroodo una Karaahsado, sababta Ilaahay u caroodana, waa in Muuminku la yimaaddo waxa Ilaahay ka xarimay ee xumaan ah, sida Sinada, Khaniisida, Tuugada, Khamri cabida iyo xumaanta kale.

http://www.sunnah.global/hadeeth/so/show/3354